

Gacaliye waalid/Masuul _____,

Ku soo dhawow _____ Dugsiga/iskuulka. Inta lagu guda jiro hawsha diiwaangelinta, qoysaska oo dhan waxay dhammaystiraan Sahanka Isticmaalka Luqadda. Iyada oo ku saleysan jawaabaha aad ku bixisay Sahanka Isticmaalka Luqadda dugsiga waxaa looga baahan yahay inuu qiimeeyo xirfadaha Ingiriisiga ee cunugaaga iyadoo la baarayoo heerka aqoonta luqadeed.

Waaxda Waxbarashada ee Maine waxay soosaartay hanaan kale oo lagu aqoonsado ardayda inay yihiin barteyaal Ingiriis ah intii lagu gudajiray Cudurka saf marka ah ee COVID-19. Nidaamkani wuxuu sii socon doonaa inta lagu jiro xilli kasta oo uu carqalad ku yimaado hawlgallada fool-ka-foolka ah ee iskuulka ee ka dhashay faafida cudurka saf mareenka ah. Sharciga federaalku wuxuu farayaa in dhammaan ardayda barta Ingiriisiga lagu aqoonsado soddon maalmood gudahood markay isdiiwaangeliyaan bilawga sannad dugsiyeedka ama laba toddobaad gudahood ee isdiiwaangelinta bartamaha sannadka (Qaybaha 1112[e][3] iyo 3113[b][2]) ee Sharciga Waxbarashada Hoose iyo Sare). Ogsoonow in aqoonsiga bartaha Ingiriisiga ee laga sameeyay gobolada kale aan laga aqoonsanayn Maine, iyo dhammaan ardayda cusub ee isqorista waa inay maraan nidaamka aqoonsiga ee looga baahan yahay Waaxda Waxbarashada Maine.

Waxaa ku lifaaqan baakad agab ah oo canugaaga u baahan doono si loo dhameystiro nidaamka baaritaanka fog. Fadlan baakadan ku xifdi meel aamin ah oo dib ha ula eegin ilmahaaga ama ha la wadaagin dadka kale. Baaritaanka waxaa lagu sameyn doonaa taleefan ama wicitaan fiidiyoow ah wuxuuna qaadan doonaa ilaa soddon daqiiqo. Inta lagu guda jiro baaritaanka, fadlan hubi in canuggaaga uu haysto meel deggan oo ka madax-bannaan wax carqalado ah. Haddii ilmahaagu aanu hubin ama xishood lahayn, ku dhiirrigeli inay sida ugu fiican isku dayaan, laakiin fadlan ha siin wax caawimaad ama jawaabo ah sababta oo ah waxay ka dhigaysaa natiijoyinka mid aan sax ahayn.

Sida horeyba laguugu sii qorsheeyay, baaritaanka cunugaaga wuxuu socon doonaa:	Taariiqda	Waqtiga
Haddii taariikhdani adiga kuu shaqeyn weydo, ama haddii aad u baahan tahay turjubaan oo aadan hore u codsan mid, fadlan wac:		
Magaca Macallinka sameynaya baaritaanka:		

Waxaad heli doontaa warqad ogeysiis waalid / ilaaliye ku saabsan heerka aqoonta Ingiriisiga ilmahaaga iyo talooyinka shaqaalaha dugsiga ee ku saabsan adeegyada taageerada helitaanka luuqadda Ingiriisiga, haddii ay khuseyso.

Haddii xirfadaha luqadda Ingiriisiga ee ilmahaagu ay yaalliin *bilowga* , *soo baxaya* , ama *kobcaya* , ilmahaagu wuxuu ka heli doonaa taageerada barashada luqadda Ingiriisiga macallin aqoon u leh oo qayb ka ah Barnaamijyadooda tacliimeed gudaha dugsigeenna. Taageeradan waxaa la bixin doonaa ilaa cunugaada uu sifiican ugu yaqaan Ingiriisiga.

Ardayda ku jirta heerka soo koraya, baadhitaan labaad ayaa la siin doonaa markay suurtoagal tahay in si fool ka fool ah loo sameeyo. Baadhitaankan labaad wuxuu xaqiijin doonaa haddii ilmahaagu sii wado inuu u baahan yahay taageerada barashada af Ingiriisiga iyo in kale. Arday kasta oo dhibco ka sarreeya 'heerka horumarinta' uma baahna doono taageerada la qabsashada af Ingiriisiga.

Waxaan rajeyneynaa inaan kula shaqeyno si aan u dhameystirno howlaha baaritaanka fog. Haddii aad wax su'aalo ama walaac ah qabtid, fadlan soo wac _____. Shaqaalaha dugsigeenu waxay ku faraxsan yihiin la shaqaynta ilmahaaga sannad dugsiyeedkan, waxaan kugu soo dhaweyneynaa bulshada dugsigeenna.

Daacadnimo,
